



Deeqda \$2.8 milyanka ahi waxa ay ka caawin doontaa PPS qaabka dhigista xisaabta ee ardayda K-5

Mashruuca waxa la yidhaa Developing Leaders, Transforming Practice – ama DLTP. In kasta oo magacu waxa uu muujinayo nidaam aqooneed aad u adag, ujeedada mashruuca waxa lagusoo koobi karaa kalmadaha borofeesarka Portland State University, Nicole Rigelman: “Si fiican u fahamsiinta xisaabta carruurtaada.”

Dugsiyada Dadweynaha Portland, iyaga oo la kaashanaya Gobolka Portland iyo RMC Research, waxa uu fulinayaa DLTP, mashruuc soconaya afar sano oo lagu isticmaalayo cilmi-baadhisti iyo xogta si loo qaabeeyo dhigista xisaabta ardayda PPS ee kujirta barbaarinta ilaa fasalkooda shanaad. Mashruuca waxa lagu fulinayaa deeq dhan \$2.8 milyan taasi oo ka timiday National Science Foundation.

Mashruucu waxa uu sheegi doonaa nooca dhigista ee sida ugu fiican ugu shaqaynaysa xisaabta k-5 ee PPS, iyada oo wadata afar nooc oo lagu qiimeeyay 12 PPS oo ah dugsiyada hoose (saddexdii dugsiba nooc). DLTP waxa hogaaminaya Rigelman, borofeersar ah Manhajka PSU iyo Waaxda Dhigista; Sarah Davis ee PPS, oo ah Agaasime Sare ee STEAM, iyo Rose Palmer, oo ah Macallin Imtixaanada Gaarka ah ee PK-5 ee dhigista xisaabta; iyo Chandra Lewis RMC, taasi oo gudbisa qiiimaynaha waxbarashada iyo caafimaadka.

Mashruucu waxa uu ka caawin doonaa qiimaynta habka ugu waxtarka badan ee dugsiyada si looga faa’idaysto Xeeldheerayaasha Xisaabta ee Dugsiyada Hoose (EMS) – bare leh tababar gaar ah oo ah xisaabta, hababka barista iyo hoggaaminta. Hababka la qiiimaynayo waxa kujira qaadashada hal EMS fasal kasta barista dhammaan xisaabta; qaadashada EMS fasal kasta kaasi oo tababara macallimiinta sidoo kalena isagu dhiga; qaadashada heerka dhisida ee EMS iyada oo lagu darayo mid kasta fasal; ama qaadashada heerka dhisida EMS wuxuu tababaraa dhammaan macalimiinta laakiin maaha mid wax u dhigaya ardayda.

Iyada oo la ogaysiinayo cilmi-baadhis ay soo ururiyen RMC, degmadu waxa ay u qaabayn doontaa dhigista xisaabteeda K-5 hab loo sinaado, kaasi oo qaadan kara qaabka meel wada marka, hababka degmada oo dhan, ama habab kuwaasi oo u adeegaya baahiyoo gaar ah koox ama dugsiga shakhsiyadka. Haddii kale, ujeedadu waxa ay ahaanysaa mid kali ah:

“Waa dhigis tayo leh – waa wax dhigis ujeedo leh, ku salaysan cimi-baadhis iyo qasdi,” Palmer ayaa yidhi. “waxa ay ka taageeraysaa macallimiinta inay awoodaan inay siiyan dhigista ugu fiican ardaydooda.”

Faah-faahinta afarta nooc iyo macluumaad badan, eeg [DLTP webpage](#), ama la xidhiidh [Rose Palmer](#).